

Trisam – wadashaqaynta iyo hordhaca dib u baxnaaninta - Wadashaqaynta iyo iswaydaarsiga warbixinada

Trisam waa wadashaqayn ka dhaxayso Maamullada Gobolka Gävleborg (daryeelka aasaasiga ah iyo daryeelka caafimaadka nafsiga), Försäkringskassan [Khasnadda caymiska bulshada], Arbetsförmedlingen [Xafiiska Shaqada] iyo Dowladda hoose. Wadashaqaynta Kooxda Trisam waxaa laga hirgeliyay dhammaan degmooyinka Gobolka Gävleborg. Kooxda Trisam waxay ka kooban tahay maamuleyaasha Försäkringskassan, Arbetsförmedlingen iyo Dowladda hoose. Kuwa Gobolka Gävleborg waxaa kaloo kamid ah iskuduleyaasha arrimaha dib u baxnaaninska iyo shaqaalaha adeegyada caafimaadka waa haddii loo baahdo. Waxaan u shaqeynaa sidii aan kuu siin lahayn taageero ka wanaagsan oo dhammaystiran oo ku saabsan dib u baxnaanintaada.

Markii lagula kulmi doono wuxuu maamuleha Försäkringskassan ka soo xigsan doonaa oggolaansho aan qoraal ahayn.

Sidii aan si heer sare kuugu caawinno, waxaan u baahanahay warbixin guud oo adiga iyo xaaladdaada ku sugan tahay ku saabsan. Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay oggolaansho qoraal ah oo aad ku caddaynaso inaad raali ka tahay in kooxda ay is-waydaarsan karto xogtaada shaqsiyeed. Sababto ah nooca xogtaas sharci ahaan way sugan tahay.

Tusaalooyinka warbixinada lagama maarmaanka ah waa:

- xaalad-caafimaadeedkaaga
- xaaladda shaqada
- haddii berri hore dib u baxnaaninskaaga wax laga qabtay
- xaaladaha dhaqaaleed iyo bulshodeed
- haddii berri hore xaaladaada la baaray
- ra'yiga khabarada, sida ra'yiga ku saabsan xaaladda caafimaadka.
- warbixin kale oo macno u leh dib u baxnaaninskaaga

Bogga ku xiga waxaad ka heleysaa foomka oggolaanshada. Oggolaanshada waxay hirgalaysa maalinta foomka aad hoos ka saxiixdo iyo muddada iskuduleyda dib u baxnaaninskaaga la maaraynayo. Taasoo ugu badnaantii hal sano ah, laga soo bilaabo maalinta aad foomka hoos ka saxiixdo.

Waxaad awooda inaad oggolaanshadaada ka noqoto markii aad rabto. Xaaladdaas la xiriiir maamulehaaga ka hawlgala hay'adda arrintaada maarayso ama xiriiriyaha aad ku leedahay rugta daryeel-caafimaadeedka.



trisam

Oggolaanshada wadashaqaynta iyo iswaydaarsiga warbixinada ee Trisam

Magaca	Tobbanka lambarro ee aqoonsiga
Adreeska boostada	Degmada iyo lambarka boostada
Lambarka taleefanka maalinimada	Mobaylka

Oggolaansho

Waxaan oggolahay in xiriiriyehayga iyo shaqaalaha goobaha daryeel-caafimaadeedka ee arrintayda khuseeyso, Xafiiska Shaqada, maamuleha ka hawlgala maamulka degmada aan degan nahay iyo Försäkringskassan ay baahidayda darteed wadashaqayn karaan.

Markii lagula kulmi doono wuxuu maamuleha Försäkringskassan ka soo xigsan doonaa oggolaansho aan qoraal ahayn.

Waxaan raali kaa ahay in wakiillada hay`adaha ay is-waydaarsan karaan xogtayda lagamamaarmaanka ah, iyo in ay akhrisan karaan dukumentiyada caadiga ah iyo kuwa caafimaadka ku saabsan iyada oo aan wax caqabad ah la gelin sirta si loo Trisam hab firfircoon taageerada geedisocdka dib u baxnaaniskayga ii siiso.

Waxaan kaloo oggolahay in maamullada ama shaqsiyaadka ay wadashaqayn karaan, sidii aan ku helo taageero heer sare ah oo xiriir la leh arrimaha dib u baxnaaninkayga. Fadlan hoos ku qor magaca shaqsiga ama loo shaqeeyaha. Oggolaanshada maamullada ama qofka waxay ansaxsan tahay oo keliya ilaa laga soo gabagabeeyo hawlgallada Trisam.

--	--

Waxaan ogsoon nahay in aan oggolaanshadayda ciribtiri karo markii aan rabo. Macnaha haddii aan oggolaanshadayda ciribtiro suurtagal ma noqon doonto in dhinacayada ay is-waydaarsadaan xog aniga ii khuseeyso oo xiriir la leh oggolaanshadii hore. Xogta halkaan hoos ku qoran waa la maarayn karaa, laakiin lama dhamaystiri karo ama cusboonisin karo.

Saxiixa

Taariikhda

Qor saddexdaada magac



Aqoonsiga la ilaaliyo /warbixin-shaqsiyeedka la ilaaliyo

Shaqsiyaadka aqoonsigooda la ilaaliyo ama warbixin-shaqsiyeedkooda la ilaaliyo, ma khuseeyaan wadashaqaynta Trisam. Sidaas darteed, hoosta ha ka saxiixin foomka oggolaanshada haddii aqoonsigaaga la ilaaliyo ama warbixin-shaqsiyeedkaaga la ilaaliyo.

Su'aallo?

Wixii su'aallo ah waxaad kala xiriiri kartaa maamulehaaga ka hawlgalo hay'adda arrintaada khuseeyo, ama xiriiriyaha aad ku leedahay rugta daryeel-caafimaadeedka.

Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan qaabka Trisam iyo hay'adaha wadashaqaynta dib u baxnaaniska ka dhaxayso, ka akhriso baraha internetkooda.